

Waxaan qoraalkan kugu casumayaa in aad ka soo qayb gashid Kulanka Bulshada Aaladda Internet-ka ku saabsan Takoorka Dadka Madow ee Vancouver, faahfaahintiisuna halkaan hoose ku qoran tahay:

Goorta: 6-8pm Khamiis, September 24

Goobta: [Shirka Aaladda maqalka iyo muuqaalka ee barta](#) waa haddii aad rabtid in aad ka qayb qaadatid

Daawo: Kulanka bulshada waxaa toos looga soo deynayaa aaladda [YouTube](#) waa haddii aad rabtid in aad daawatid kulanka oo aadan dooneyn in aad ka qayb gashid qof ahaan

Kulanka bulshada waxaa marti-galin doona Dawladda Degaanka Vancouver waxaana fududayn doona Vanessa Richards oo ah halgame bulsho. Waxaan kuu casumaynaa in aad kulankaan naga la soo qayb gashid si aan ugu wada hawlgalno annagoo shaqada iska kaashanayna in aan gacan ka geysano abuuridda magaalo qof kastaaba ku dhex baraari karo.

Madasha kulanka, Maareeyaha Magaalada, Sadhu Johnston iyo Anigu waxaan ka hadli doonaa dhammaan talooyinka iyo fikradaha guud ee ay nala wadaageen jaalliyadaha bulshada Dadka Madow iyo kuwa Afrikaanka ah. Waxaan garowsan nahay inta hawshaan lagu dhex jiro in aan nahay arday aan hoggaamiye ahayn.

Ujeeddadayadu waa in aan ku siino fursad aad ku soo gudbisid fikradaha, baahiyaha mudnaanta leh, tabashooyinka iyo waxyaabaha aad hiigsaneysid marka aan qeexayno tallaabooyinka ku xiga ee aan u baahan nahay in aan qaadno si loo daboolo baahiyahaan/codsiyadaan.

Kulankaan bulshada waxaan casumaynaa oo diiradda ku saaraynaa xubnaha jaalliyadaha bulshada Dadka Madow iyo Afrikaanka si aragtiyahooda iyo codadkooda loogu soo bandhigo madasha kulanka, waxaanan rajeynayaa in aad ka soo qayb gashid. Kulankaan bulshadu waa tallaabo muhiim ah oo looga wada shaqaynayo in la abuurto hay'ad la shaqaysa jaalliyadaha bulshada si loo abuurto caddaalad, sinnaan, kala-duwanaa, wadatashi iyo isla-xisaabtan.

Waxaan kugu dhiirri galinaynaa in aad su'aalahaaga iyo fikradahaaga nala soo wadaagtid kulanka ka hor. Tanu waxay xaqiijin doontaa in la dhageysto codadka ugu fara badan ee suurtagalka ah. Su'aalaha waxaa lagu soo gudbin karaa:

- Adoo ku soo dira iimeylkaan [equity@vancouver.ca](mailto:equity@vancouver.ca)
- [Adoo booqda bartayadan internet-ka](#) waliba aad ka heleysid xogaha dhammaystiran ee kulanka.

Dawladda Vancouver waxaa ka go'an in ay ka jawaabto dhammaan su'aalaha na soo gaara, kuwa aan looga jawaabin madasha kulanka dhexdeedana ay uga jawaabi doonto iimeyl

kulanka ka bacdi.

Waxaan kaloo jeclahay in aan fursaddaan uga faa'iideysto in aan idiinka mahadceliyo dhammaan talooyinka iyo codsiyada faahfaahsan oo ilaa hadda nalala soo wadaagay. Talooyinkaanu waxay sii qaabeynayaan nadaamyada aan go'aamada u qaadano iyo sinaanta iyo shaqada la dagaalanka takoorka ee hadda socda. Talooyinka oo la soo koobay iyo shaqada aan ilaa hadda qabanay waxay ku lifaaqan yihiin iimeylkaan, waxaad kaloo wixii faahfaahin ah ka akhrisan kartaa guud ahaan shaqada la dagaalanka Takoorka ee Dawladda Vancouver [halkaan](#).

Waxaan ku sii faraxsanahay fursadaha iskaashiga iyo wax baddalka ka soo bixi doona inta aan kulanka wada joogno.

Waxaan ka xumahay in aanan xilligan keeni karin turjumaanid toos ah inta kulanku socdo, haseyeeshee waxaan ku dhiirrigalin lahayn guryaha dadka ku hadla afafka badan ay gacan ka geystaan turjumaanidda Af Ingiriiska.

Fadlan ila soo xiriir haddii aad qabtid wax su'aalo ama tabashooyin ah oo ku saabsan kulankaan bulshada.

Mahadsanid,

Sandra Singh